



# Kusoo dhowoow xarunta dhalinyarada!

Xarunta Dhalinyarada waa qeyb ka mid ah Waaxda Dhalinyarada ee Magaalada Helsinki Waxay dhalinyarada siiyaan howlo xiiso badan oo tayo sare leh. Cabista sigaarka iyo cabitaanka sarqaamida waa ka mamnuuc dhammaan inta lagu jiro howlaha dhalinyarada ee ay soo abaabushay Magaalada.

## Maxaa la bixinayaa?

Waxaa jira Xarumo Dhalinyaro loogu talagalay oo da'dooduna u dhexeyso 9 ilaa 18 sano jir ee magaalada jooga. Xarunta Dhalinyarada waxay dadka da'da yar kala kulmi karaan saaxiibo oo ayna kala qeybgeli karaan howlo badan, oo isugu jira naadi, cayaaro, tamashleyn iyo xerooyin. Waxaa ku sugan shaqaale Dhalinyaro oo dadwaaweyn ah una tababaran Xarunta Dhalinyarada.

Xarunt dhexdeeda, dhalinyarada waxay iskooda u sameysan karaan qorsho iyo howlo. Xarumaha Dhalinyarada qaar ayaa waxay ku taqasuseen balwadaha qaar sida tiyaatarka, muyuusikada iyo dheesha. Waxaa kaloo jira kooxo farshaxan iyo gacanta farshaxan ku qora iyo Xarumaha qaar ee Dhalinyarada waxay abaabulaan howlo lagu bartilmaansanayo gaar ahaan gabdhaha iyo wiilasha.

## Yaa imaanaya?

Howlaha ay soo abaabuleen Waaxda Dhalinyarada waxaa loogu talagalay dhammaan dadka da'da yar ee ku nool magaalada Helsinki. MAr haddu qof dhaliyaro ah helo kaadhka xubinimada, wuxuu/waxay ka qeyb gali karaa/taa howlaha lagu qabanayo Xarunta Dhalinyarada ee Helsinki, Espoo, Vantaa iyo Kauniainen. Kaadhka xubinimada Xarunta Dhalinyarada waa bilaash waxaana laga heli karaa Xarunta Dhalinyarada. Fasax waalid ayaa loo baahanyahay si aad u hesho kaadhka. Waalidiinta waxaa la warsanayaa macluumaadka laga xiriirayo sidaa darteed shaqaalaha Xarunta Dhalinyarada waa ay la soo xiriiri karaan, haddii ay lagama maarmaan tahay.

## Iskaashiga lala yeelanayo waalidiinta

Shaqaalaha Dhalinyarada waa ay ku faraxsan yihiin inay la shaqeeyaan waalidiinta. Waalidiinta waa lagu soo dhoweynayaa inay yimaadaan oo ay wax badan ka bartaan howlaha lagu hayo Xarunta Dhalinyarada waxay kaloo ku tabaruci karaan inay ka shaqeeyaan Xarunta Dhalinyarada. Waaxda Dhalinyarada waxay waalidiinta daneynaya tabarucaada siisaa tababaro.

**So booqo Xarunta Dhalinyarada oo wax badan ka baro!**